

**SOOMAALIYA:
KAALMADA
CAALAMIGA EE
CIIDAMMDA
QALABKA SIDA
IYO BOOLISKA
WAA IN DIB LOO
EEGAA**

**AMNESTY
INTERNATIONAL**



Amnesty International Publications

First published in 2010 by
Amnesty International Publications
International Secretariat
Peter Benenson House
1 Easton Street
London WC1X 0DW
United Kingdom
www.amnesty.org

© Copyright Amnesty International Publications 2010

Index: AFR 52/001/2010
Original Language: English
Printed by Amnesty International, International Secretariat, United Kingdom

All rights reserved. No part of this publication may be reproduced, stored in a retrieval system, or transmitted, in any form or by any means, electronic, mechanical, photocopying, recording or otherwise without the prior permission of the publishers.

Amnesty International is a global movement of 2.2 million people in more than 150 countries and territories, who campaign on human rights. Our vision is for every person to enjoy all the rights enshrined in the Universal Declaration of Human Rights and other international human rights instruments. We research, campaign, advocate and mobilize to end abuses of human rights. Amnesty International is independent of any government, political ideology, economic interest or religion. Our work is largely financed by contributions from our membership and donations

**AMNESTY
INTERNATIONAL**



TUSMO

Hordhac.....	4
Gogoldhig.....	6
Hubka Adduunku Ugu Deeqayo Ciidamada DFKM	10
Tababaridda Ciidamada Qalabka Sida Iyo Booliska	13
Talooyin	17
Lifaaq.....	22
Shaxda 1: Waxa Hadda Loo Ballanqaaday Tababarka Ciidamada Ammaanka Ee Hay'adaha Qaybta Ammaanka Ee Somalia	22
Shaxda 2: Deeq Maalgelineed Ee Kale Oo Loo Ballan Qaaday Qaybta Ammaanka Ee Somaliya Abril 2009.....	31
Tixraacyo	32

HORDHAC

Qoraalkan Kooban wuxuu ku saabsan yahay jiritaanka iyo wararka la xiriira hubka, tababarrada iyo kaalmooyin kale ee dhowaanahan loogu deeqay ciidamada amaanka ee Dowladda Federaalka ku-meel-gaarka ee Soomaaliya(DFKMS). Wuxuu soo koobayaa welwelka ay Hay'adda Xuquuqda Caalamiga(Amnesty International) ka qabto maqnaanta heer caalami ee Xuquuqda Aadanaha iyo is-la xisaabtan waxtar leh oo la xiriira kaalmadan ciidan iyo siyaasadeed marka la eego xaaladda liidata ee xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya.(1) Hay'adda Xuquuqda aadanaha waxay ka welwelsan tahay:

- Hubka iyo rasaasta loo gudbinayo Dowladda Federaalka ku-meel-gaarka ee Soomaaliya ayada oo aysan jirin ilaalin ku filan si loo hubiyo in aan hubkaas loo adeegsanin ku xadgudubka xuquuqda aadanaha;
- Tababar la siiyo ciidamada ammaanka ayada oo aan la qaadin
- Tallaabooyin ku filan ee kormeer;
- Qaar ka mid ah tababarrada oo la qorsheeyay ayada oo aan si wacan loo ogeysiinin guddiga cunaqabatada ee Q.M. sidaas darteedna ay luggooyo ku noqoto cunaqabatada hubka ee ay Q.M. saartay Soomaaliya;
- Ayada oo aan la bixinin tababarro xagga xuquuqda caalamiga ee aadanaha iyo qaanuunka aadanahimo;

Laga soo bilaabo bishii Jaannayo 2009 kolkii Sheikh Shariif Sheikh Axmed loo magacaaby madaxweynanimada Soomaaliya ee DFKM waxaa sare u kacay ballanqaadka dhabta ah ee caalamiga dhanka ciidamada , booliska iyo hay'adaha ammaanka . Waxaa kordhay labada dhinac ee ballanqaadka deeq bixiyayaasha iyo ku deeqidda tababarro iyo hubka intii lagu jiray 2009 taas oo ay gadaal ka riixaysay welwelka adduunka ee la xiriiray in ay maamulka DFKM ay soo wajahayeen weerarro hubaysan oo soo cusboonaanayay oo kaga imaanayay kooxo mucaarad ah oo hubaysan bishii May 2009 ee dhinaca gobollada Bartamaha iyo iyo koonfurta; iyo cabsi laga qabay ammaanka maraakiibta caalamiga ayada oo ay kordheen burcad badeedka hubaysan ee meelaha ka baxsan xeebaha Soomaaliya.

Si kastaba ha ahaatee , welwelka deeq bixiyayaasha ee ah inay taabbagal noqon karto DFKM iyo mudnaanta la siiyay ammaanka maraakiibta caalamiga u ma dhigmin tixgelinta la siiyay xuquuqda aadanaha ee dadka Soomaaliya iyo in la ilaaliyo dadka rayadka ah inta ay socdaan iska hor-imaadka hubaysan sida uu qabo xeerka caalamiga , gaar ahaan sida uu dalbaday Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay(QM). Hay'adda Xuquuqda (Amnesty International) waxay ka welwelsan tahay hubka loogu deeqayo, tababarrada la bixinayo iyo maalgelinta qaybta ammaanka ee DFKM ayada oo aan meel la is la dhigin arrimo ay ka mid yihiin is la

xisaabtan, maamulka hubka iyo booliska iyo ciidamada ammaanka ee Soomaaliya in ay ixtiraamaan xuquuqda aadanaha; iyo ayada oo ay jiraan is beddel joogto ah ee isbahaysi oo ka dhexeeya ciidamada ammaanka ee DFKM iyo isbahaysiyadooda iyo kooxaha hubaysan ee mucaaradka ah. Ayada oo aan la helin ilaalin ku filan, hubka la dirayo wuxuu khatar ku noqon karaa xuquuqda aadanaha, wuxuuna sii xumayn karaa xaaladda aadanaha ee dadka rayadka ah ee Soomaaliya. Ilaa la helayo kormeer taabbagal ah oo habaysan, kaalmadaas qalab waxaa loo adeegsan karaa in la galo ku xadgudub khatar ah ee xeerka caalamiga ee xuquuqda aadanaha ka dhan ah, wuxuuna siin karaa taageero dheeraad ah qof iyo koox looga shakisan yahay inuu galay, siina geli karo, dambiyo dagaal iyo xadgudubyo kale oo khatar oo ka dhan ah xuquuqda aadanaha. Wuxuu kale (hubkaas) oo uu sii xumayn karaa qalalaasaha - wax ka soo horjeeda ulajeedadii kaalmadaas- waayoo halista ay kaalmadaas keeneeyso waxay soo jiidan doontaa maleeshiyaad iyo kooxo hubaysan oo taageersan ama ka soo horjeeda DFKM.

Ilaa iyo inta amaankan meel la dhigayo, bulshada caalamku waa inay joojisaa dhamaan hubka ya bixinayso, militeriga iyo qalabka ammaanka iyo kaalmada dhaqaale oo hub loogu soo gadayo DFKM, iyo inta si habboon looga hirgelinayo cunaqabatayntii hubka dhamaan qaybaha Soomaaliya laga soo bilaabo 1992.

Intaas waxaa sii dheer, si loo joojiyo dhacdooyinka is xigxiga ee ku xadgudubka xuquuqda aadanaha ee gudaha Soomaaliya, dowladaha oo dhan waa inay taageeraan soo-saaris ah Heshiis Adduunka ee ka ganacsiga hubka sidii mabda'a ahaan la isugu raacay Jamciyadda Quruumaha ka dhaxaysa in si adag loo xakameeyo diritaanka caalamiga ah ee hubka caadiga ah (Conventional arms). (2).

Si gaar ah, sida ay muujinayso wargelintan kooban, dowladuhu waa inay ku daraan Heshiiska diritaan caalami ah ee farsamo, saad iyo kaalmo dhaqaale oo waxtar u leh diritaanka iyo adeegsiga hubkan iyo xeer aasaasi ah ee diritaan caalami ah ee hubka caadiga ah iyo wixii la xiriira waa inaysan dowladuhu oggolaan ayada oo ay khatart weyn ka imanayso adeegsiga qalabkan taas oo kordhinaysa si weyn ku xadgudubka xeerka caalamiga ah, gaar ahaan xeerka caalamiga ee xuquuqda aadanaha iyo xeerka xuquuqul insaanka.

GOGOLDHIG

Qalalaasaha hubaysan ee Soomaaliya wuxuu halis culus ku yahay ammarka , xuquuqda iyo nolosha dadka rayadka ah ee Soomaaliya. Dhamaan Qaybaha ku lug leh qalalaasaha Soomaaliya waxay galeen xadgudubyo khatar ah ee xagga xeerka caalamiga ee xuquuqda iyo ku xadgudubka xaq dadka.(3) Xaaladda xuquuqda dadkuna way sii xumaanaysaa.(4). 2009kii, kooxaha mucaaradka ee hubaysan waxay fuliyeen weerarro aan loo kala aabayeelin, oo badanaaba laga soo qaaday meelo ay deggen yihiin dad rayad ah, taasoo ciidamada raacsan DFKM ay ka bixiyeen jawaab ka xooggaan tan kale oo aan loo kala aabayeelin oo aan kala sooc lahayn.(5). Sannadkii la soo dhaafay kooxaha hubaysan ee mucaaradka ah waxay xataa si isa soo taraysay u fuliyeen xadgudubyo ay ka mid ahaayeen qofka oo laga jaro qaar jirka ka mid ah, dhagax lagu dilo iyo in meelo fagaare ah lagu toogto (dad) dhulka ay ka taliyaan.(6). Iska hor-imaadyo hubaysan iyo ammaan darro xataa waxay halis ku yihiin ammaanka shaqaalaha gargaarka iyo kaalmada bani-aadannimo oo la gaarsiyo dad gaaraya 3.7 milyan, qiyaastii nus dadweynaha, noloshoodu ku tiirsan tahay. Kooxaha mucaaradka hubaysan waxay dhaceen xireenna xafiisyada hay'adaha gargaarka, waxayna soo saareen qoraallo digniin ah oo ka dhan ah shaqaalaha gargaarka iyo dhaqdhaqaaqayaasha bulshada rayadka sannadkii hore ee gobollada bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya, kuwaas oo horjoogsaday gargaarka dadka rayadka ah iyo in warar laga helo xaaladda liidata. Xadgudubyadan badankoodu waxay dhaceen ayada oo aan waxba laga qaban kuwii geystay.

Marka laga soo tago cunaqabatada QM ee hubka ee Soomaaliya , dalka waxaa aad uga buuxa hub. Golaha Ammaanka ee QM wuxuu Soomaaliya ku soo rogay cunaqabato baahsan ee xagga hubka 1992kii wuxuuna soo saaray guddi cunaqabato oo kormeera xannibaadda hubkaas. Golaha Ammanka mar dambe ayuu u codeeyay in si gaar ah wax loo oggolaado xayiraadda hubka.(7). Waxaana ka mid ahaa:

- In loogu deeqo qalab ciidan oo aan wax dilin oo loola jeedo kali banii aadannimo ama u adeegsi difaac, sida ay horay u oggolaaday guddiga xayiraadda hubka, sida uu qorayo Golaha Ammaanka ee QM(UNSC Resolution) go'aankiisa 2356(2001/;
- Deeq hub iyo qalab ciidan iyo tababar farsamo iyo kaalmo loogu talagalay kali kaalmada ama adeegsiga Midowga Afrika, howlgalka taageeraya nabadda ee Soomaaliya(Horay loo oran jiray IGASOM, haddana loo yaqaan Howlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya- AMISOM-);
- Deeq iyo kaalmo farsamo oo loola jeedo kali hadaf lagu kaalmaynayo horumarinta qaybta hay'adaha ammaanka ee dowladda Federaalka Ku-meel gaarka ah(DFKM) ee Soomaaliya, ayada oo meesha uu ka maqan yahay go'aan diidmo ee guddiga cunaqabatada 5 maalmo shaqo gudahood in lagu helo ogeysiintaas; dowladuhu waa inay horay u wargeliyaan guddiga cunaqabatada ayada oo arrinta loo eegayo mid mid, sida uu qorayo go'aanka Golaha Ammanka ee QM oo ah 1744(2007) iyo 1772(2007);
- Kaalmo farsamo ee Soomaaliya iyo dowladaha deriska si loola dagaallamo burcad badeedka, taas oo ay tahay in guddiga cunaqabatada uu ka joojiyo;

- Hub iyo qalab ciidan oo loola jeedo oo kali ah adeegsiga dowladaha xubnaha ah iyo urur goboleedyada tallaabo ka qaada burcad badeedka iyo dhaca hubaysan ee loo geysto badaha, oo wax la qabanaya dowladda FKM; tani waxay ku xiran tahay in marka hore dowladda FKM ay wargelin u gudbis Xoghayaha Guud ee QM, tallaabada la qaadayana waa in ay la jaanqaaddo xuquuqda caalamiga iyo xeerka caalamiga ee bani-aadannimo, sida uu qabo go'aanka Golaha Ammaanka ee QM 1851 (2008);

Xayiraadda Hubka waxaa loogu xadgudbay si joogto ah sannadihii la soo dhaafay waxaana hub loo gudbiyay kooxaha hubaysan ee dhinacyada iska-soo horjeeda oo dhan. Hubka Soomaaliya ku shubmaya wuxuu sii shidayaa ku xadgudubka khatarta ah ee xuquuqda insaanka ee ay galeen dhinacyada qalalaasaha oo dhan. Sida ay sheegeen guddiga QM ee kormeerka ee Soomaaliya, kaas oo soo ururiya warar la xiriira ku-xadgudubka xayiraadda hubka, kooxaha hubaysan ee ka soo horjeeda DFKM wuxuu hubkaas ku gaaray dhinaca ganacsiga oo laga soo dhoofiyay Yemen, waxayna kaalmo dhaqaale ka heleen Eritrea, deeq bixiyeyaal Adduunka Carabta iyo qurbajoogta Soomaalida.(8). Hay'adda Amnesty International waxay ka soo horjeeddaa hub loo gudbiyo kooxaha hubaysan ee Soomaaliya, waxaana jira caddaymo ku filan in hubkaas loo adeegsado in la galo ku-xadgudub xuquuqda aadanaha. Hay'adda Amnesty International waxay codsi u gudbisay Golaha Ammaanka ee QM si loo qaado tallaabo lagu adkaynayo xayiraadda hubka, oo ay ka mid tahay in la hubiyo in kooxda kormeerka ee QM ay hesho imkaaniyaad iyo awood ay ku fuliso xilqaadkeeda., iyo in ay soo rogto xayiraad bartilmaameed leh, ka dib waddo muuqata oo cad, oo laga qaadayo ashkhaasta iyo hay'adaha ka soo horjeesta xayiraadda hubka, taas oo taageeraysa guddiga ku-xadgudubka xuquuqul insaanka caalamiga ah iyo xeerka banii-aadannimada. 2008dii Golaha Ammaanka wuxuu soo saaray go'aanka 1814, kaas oo xilsaaray guddiga xayiraadda ee Soomaaliya oo la siiyay soo-jeedin in si gaar ah loo bartilmaameedsado tallaabooyin ka dhan ah ashkhaas ama hay'ado jebinaya xayiraadda hubka iyo kuwa ku kaalmeeya inay sidaas sameeyaan. Golaha Ammaanka go'aankiisa 1844(2008) wuxuu soo koobayaa nooca tallaabooyinka, oo ay ka mid tahay xayiraad safar iyo hantida oo laga fariisiyo. Guddiga xayiraadda ee Soomaaliya wali ma tilmaamin ashkhaasta ama hay'adaha la xayirayo sida uu qabo go'aankaas.

Si kastaba ha ahaatee, Disembar 23, 2009, Golaha Ammaanka wuxuu cunaqabato hub ku soo rogay Eritrea oo ah kaalmada ay siiso kooxaha hubaysan ee xagaldaacinaya nabadda iyo ammaanka Soomaaliya, iyo sababo la xiriira khilaafka xudduudka ee ka dhexeeya Eritrea iyo D'Jibouti sida uu qabo go'aanka 1907(2009). Go'aanku wuxuu xilsaarayaa guddiga xayiraadda ee Soomaaliya, isaga oo kaalmo ka helaya Kooxda Kormeerka oo haddana kormeeraya xayiraadda hubka ee la saaray Eritrea. Isla go'aankaas wuxuu qorayaa xayiraad safar iyo hanti la fariisiyo oo lagu soo rogo ashkhaas, ay ka mid yihiin hoggaamiyeyaasha siyaasadda iyo ciidanka ee Eritrea oo uu soo saaro guddiga xayiraadda ee Soomaaliya. Soo rogista xayiraadda ka dhanka ah Eritrea waxay siinaysaa guddiga cunaqabatada awood goboleed, waxayna u baahan tahay isku-dubbaridid dadaal iyo diyaarsanaan siyaasadeed ee dowladaha oo dhan, gaar ahaan kuwa deriska oo la rabo inay u hoggaansamaan qodobbada iyo in ay ka shaqeeyaan sidii loo hirgelin lahaa. Intaas waxaa dheer, xilka dheeraadka ah ee labada guddi, kan xayiraadda iyo kooxda Kormeerka taas oo tilmaamaysa baahida loo qabo in la helo imkaaniyaad dheeraad ah si howshoodu ku noqoto taabbagal.

Bulshada caalamku waxay kale oo ay ka welwelsan tahay burcad badeedka hubaysan ee ka baxsan xeebaha Somalia, taas oo halis gelinaysa nolosha iyo ammaanka badmaaxayaasha iyo in gargaarka insaanka lagu gaarsiyo Somalia xagga badda. Burcadnimada, oo ka dhalatay sannado badan oo uu jiray iska-hor-imaad hubaysan, kala dambayn la'aan iyo dhaqaale darro ka dib burburkii ku yimid qarankii Somalia 1991dii, waxaa kale oo sii ololiyay ka –ganacsiga hubka oo kordhay, gudaha ama ha soo galo e'. Sida ay sheegtay Kooxda Kormeerka ee QM ee Somalia, burcaddu si sahlan ayay uga helaan hubka gudaha Somalia, waxayna awoodaan inay ku soo gataan lacagaha ka soo gala qafaalashada iyo madaxfurashada, waxaana suurtagal ah in qaar sare oo burcadda ka mid ah ay ku xadgudbaan xayiraadda.(9) Xoghayaha Guud ee QM wuxuu ka codsaday dowladaha oo dhan inay u taageeraan si isku dubbaridan si loo wajaho sababta ugu weyn ee burcadnimada, marka lagu daro qalalaasaha, dowladnimo la'aanta, xukunka sharciga oo burburay iyo wax nolosha lagu maareeyo oo aan dhulka ka jirin, isla markaasna aan la hirgelin xayiraadda hubka ee QM ee Somalia.(10).

Hoggaamiyayaasha DFKM oo la sameeyay ka dib dadaalkii QM ee heshiiskii nabadda ee Djibouti 2008 waxay si xiriir ah ku celceliyeen in kaalmo caalami ah loo helo ciidamooda ammaanka ayaga oo wajahayay kooxo mucaarad ah oo hubaysan oo hadda ka taliya inta badan bartamaha iyo koonfurta Somalia, marka lagu daro magaalooyin waaweyn. Maanta, DFKM waxay ka talisaa wax in yar ka roon dhowr degmo ee caasimadda, Muqdishu, waxaana weerar joogto ah ku haya kooxo hubaysa. U –kuurgalayaal badan waxay aaminsan yihiin in AMISOM(11) la'aanteed aysan DFKM joogi kari lahayn dalka.

18 sano oo qalalaase hubaysan ah ka dib burburkii dowladdii Dhexe ee Somalia 1991, waxaa jira kooxo hubaysan oo aad u badan oo ka howlgala Somalia, marka lagu daro maleeshiyaadka qabaailka, maleeshiyaad la xiriira hoggaamiye-kooxeedyo, ciidamo hubaysan oo xulufo la ah DFKM, kooxo hubaysan oo ka soo horjeeda DFKM iyo dembiileyaal mooryaan hubaysan ah. Kooxahan sida badan way isku dhafan yihiin, waa xulufo is beddelaysa, ama kala qaybsamaysa. Dhamaadkii 2006dii, Ciidamada Itoobiya oo taageeraya DFKM ee markaas ayaa faragelin ku sameeyay Somalia si meesha looga saaro Midowgii Maxkamadaha Islaam, oo ahaa is-bahaysi Maxkamado Islaami ah kuwaas oo qabsaday Muqdishu iyo meelo kale, taas oo natiijadii noqotay koror ku xadgudubka xeerka xuquuqda caalamiga ee insaanka halkaas oo qaybaha ku lugta leh qalalaasaha ay ku xadgudbeen xuquuqda aadanaha.

Joogitaanka iyo dhaqanka ciidama Itoobiya waxay hurisay mucaarad hubaysan oo ka soo horjeeda DFKM. Markii maxkamadaha la jabiyay ciidan ahaan, wixii ka haray maxkamadaha ayaa dagaal la galay DFKM iyo is-bahaysigeeda, Itoobiya. Qaar ka mid ahaa hoggaamiyayaashi Midowgii maxkamadaha ayaa dhisay Isbahaysiga Dib-u-Xuraynta Somalia, kuwo kalena dib ayay isugu habeeyeen dhaqdhaqaaqa AL-Xarakat Al Mujahidin Al-Shabaab, oo sida badan loo yaqaan Al-Shabaab, taas oo noqotay garabka hubaysan ee Midowgii Maxkamadaha Islaamka. 2008dii maxkamadihii waxay ku kala jabeen dedaalkii nabadda ee ay horseedday QM oo ka dhacay Djibouti, ayada oo koox uu hoggaaminayay Sheikh Shariif Sheikh Axmed(Kooxda Djibouti) ay la galeen wadahadal nabadeed DFKM, ayada oo kooxdii uu hoggaaminayay Sheikh Xasan Dahir Aweys(Kooxda Asmara) ay diideen dedaalkii nabadda ee Djibouti.

Wadahadalladii Djibouti waxaa ka soo baxay heshiis nabadeed iyo xabbad-joojin Oktobar 2008, taas oo u dhaxaysay DFKM iyo Kooxda Djibouti.(12), waxay noqotay in la ballaariyo Barlamaanka Federaalka ku-meel-gaarka ah oo lagu kordhiyo xubno ka mid ahaa Kooxdii

Djibouti iyo in xubnaha barlamaanku ay doortaan madaxweyne cusub . Hadda ciidamada ammaanka ee DFKM ah magac ahaan waxay ka kooban yihiin xubno ka mid ahaa ciidanki hore ee DFKM, boolis iyo ciidamada sirdoonka, iyo xubno ka tirsanaa kooxdii hore ee Djibouti; kuwaas oo hoggaamiyehoodi Sheikh Sharif Sheikh Axmed uu hadda yahay madaxweynaha DFKM. Caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan DFKM hadda waa sidii ay ku samayn lahayd hoggaamin midaysan iyo sidii ay u xakamayn lahayd si asluubaysan ciidamdan ammaanka iyo malishiyada kala duwan. DFKM waxay bishii Juun, 2009, heshiis la gashay kooxda suufiyada, Ahlu Sunna Wal Jamaaca ee bartamaha Somalia, kooxdaas oo soo baxday qaadatayna hub ka dhan ah Al-Shabaab dhamaadkii 2008, ka dib markii ay Al-Shabaab mudan darro ku sameeyeen qabiyada Suufiyada. Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxay kaalmo ciidan ka heleen Itoobiya.

Mucaaradka hubaysan ee ka soo horjeeda DFKM wuxuu ka kooban yahay garabkii hore ee Asmara taas oo isbahaysi ku la baxday magaca Xisbul Islaam iyo saddex urur oo kale oo hubaysan, oo kala ah: Raas Kambooni, Jabhatul Islaam (JABISO) iyo xerada Caanoole; iyo Al-Shabaab oo taliyayaashoodu hadda ay ka taliyaan bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya. Xisbul Islaam iyo Al-Shabaab waxay ciidamo isku darsadeen Bishii May 2009, si ay u qaadaan weerar ka dhan ah DFKM iyo AMISOM; si kastaba ha ahaatee, qaybtii dambe ee 2009, Xisbul Islaam iyo garabyada Al-Shabaab waxay isugu dhaceen ciidda gacanta ku haynaysa magaalada Kismaayo iyo dekada iyo dhulka koonfurta Somalia oo ku dhow xudduudka Kenya. Iska hor-imaadyadan waxay tilmaamayaan is-beddel ku yimaada is-bahaysiyada. 2009kii qaar ka mid ah xubnaha Xisbul Islaam ayaa ku biiray DFKM, isla markaasna qaar DFKM xiriir la lahaa ayaa u baxsaday dhanka Xisbul Islaam. Waxaa la sheegayaa in dagaal-yahanno ay u baxsanayaan dhinacyada kala duwan, marka lagu daro xubno ka tirsan DFKM ciidamadeeda ammaanka oo la sheegayo inay ku biireen kooxaha kacdoonka hubaysan ka dib kolkii la siin waayay mushaar, ama garabyo ka tirsan kooxaha hubaysan ayaa ku biiraya DFKM ayaga oo ka hinaasay xulufadoodii hore.(13)

Bishii May 2009, Golaha Ammaanku wuxuu ku boorriyay DFKM in la helo qayb ammaan oo la la xisaabtamo oo habaysan, marka lagu daro maamul iyo farsamo kormeer si loo hubiyo in la ixtiraamay xukunka xeerka iyo in la ilaaliyo xuquuqda aadanaha. Golaha Ammaanka wuxuu kale oo uu u xilsaaray Xoghaya Guud inuu ka kaalmeeyo DFKM sidii ay u qorshayn lahayd istaraatiijiyad ammaan si loo la dagaallamo hubka sharci darrada ah ee kontrobaanka ah, sidii loo meelmarin lahaa hub-ka dhigis, abaabul-ka-siib, isku dhafid iyo in la hormariyo caddaalad iyo awood xabsiyeed (14). Hay'adda Amnesty International waxay ka welwelsan tahay, ayada oo aan la helin kormeer iyo is la xisaabtanka loo baahan yahay, ballanqaadyada hadda ee kaalmada ammaanka oo la siinayo DFKM in ay xagaldaaciyaan dadaalka loogu jiro in la hagaajiyo ku dhaqanka sharciga iyo in la dhowro xuquuqda insaanka, taas oo gaar ahaan laga doonayo ciidamada ammaanka ee DFKM. Si gaar ah, waxaa jira halis weyn oo ah in kaalmada hubka ee bulshada caalamka iyo maalgelinta loogu talagalay in hub gudaha loogu soo gado DFKM in loo adeegsado in lagu galo ku-xadgudub xuquuqda caalamiga iyo xeerka xuquuqda aadanaha, marka lagu daro weerarro aan loo kala aabayeelin ama aan isku xaddi ahayn iyo weerar toos ah oo loo geysto dadka rayadka ah iyo waxyaalaha rayadka ah.

HUBKA ADDUUNKU UGU DEEQAYO CIIDAMADA DFKM

Hubka adduunku ugu deeqay ciidamada DFKM wuu kordhay intii lagu jiray 2009kii. Kooxda Kormeerka QM ee Somalia waxay soo sheegtay in ilaa 2006dii ciidamada DFKM ay ka heleen hub iyo rasaas dowladaha Itoobiya, Yemen iyo Ugaandha, dowladahaas oo aan ku dhaqmin joojintii QM ee hubka iyo guddiga xayiraadda hubka QM ee Somalia; iyo ciidamada DFKM oo hub ka soo gatay suuqyada hubka oo ku yaalla ama u dhow Muqdisho, meeshaas oo ah meel ay dhamaan kooxaha dagaalka ku jira hub ka helaan. (15) Hay'adda Amnesty International ma caddayn karto warbixinadii hore, hase yeeshee waxay la socotaa in hub aad u badan oo uu maalgeliyay Maraykanku laga soo daabbulay Ugaandha oo loo diray xagga Muqdisho, lana siiyay ciidamada DFKM ilaa May 2009.

Bishii Agoosto 6, 2009, xoghayaha arrimaha dibedda ee Maraykanka, Hillary Clinton, waxay si cad ugu ballanqaaday kaalmo ciidanka dowladda Sheikh Shariif Sheikh Axmed, afhayeen u hadlay wasaaradda arrimaha dibeddana wuxuu sheegay in ay dowladda Maraykanku diyaar u tahay inay ugu deeqdo DFKM 40 ton oo ah hub ciidan iyo qalab, taas oo la kordhin karo mustaqbalka. (16). Hay'adda xuquuqul insaanka ee Amnesty international waxay soo-saartay May 22, 2009kii, in dowladda Maraykanku ka joogsatay ku dhaqanka guddiga xayiraadda ee QM in ay ugu deeqdo 19 ton oo rasaas ah DFKM gudaha Muqdisho oo laga soo dejiyay gegida dayuuradaha ee Entebbe, Ugaandha, toddobaadkii ugu dambeeyay ee bishii May. Shixnaddan waxaa ka mid ahaa qoriga dagaalka 7.62mm, rasaas, 12.7mm qoriga boobaha ah, rasaas, RPG-7 (rocket-propelled grenades), iyo 81/82mm rasaasta mortarka. Dowladda Maraykanku waxay kale oo ay u sheegtay guddiga xayiraadda QM in ay siinayso Somalia hub fudud iyo qoryo yaryar, oo ka kooban 48 qoryaha (propelled Grenades; 36 PKM 7.62mm qoryaha boobaha ah, 12 DShK 12.7mm qoryaha boobaha culus, iyo 10 81/82mm mortarka ah. Amnesty International waxay fahamsan tahay in ay horay u jireen, ugu yaraan, laba codsi oo Maraykanku u gudbiyay guddiga xayiraadda si uu DFKM hub ugu diro iyo mid ahaa in ciidanka DFKM loo daabbulo Ugaandha si ay tababar ugu qaataan halkaas. Amnesty International waxay la socotaa in guddiga xayiraadda ee Somalia uu oggolaaday codsiyadan, sidaas darteedna hub badan loo diray Somalia.

Inkasta oo noocyada hubkan ay ka dhigan yihiin in hub iyo rasaas ay helaan dhamaan dhinacyada ku lug leh qalalaasaha Somalia, qaar hubkan ka mid ah ayaa mudan welwel, gaar ahaan qaybta mortarka bombada. Ilaa bilowgii sannadkii 2007, Hay'adda Amnesty International waxay heshay warbixinno is-daba joog ah oo la rumaysan karo, oo ay ka heshay dad rayad ah oo ka soo cararay qalalaasaha iyo bulshada rayadka ee Somalia, wararkaas oo sheegaya in ay dhaceen duqayn kala duwan oo aan cidna loo kala aabayeelin ee meelaha aadka loo deggen yahay iyo meelaha rayadka gudaha Muqdisho oo ay ku dhaceen mortarro aan meelna ku abbaarayn iyo madaafiic oo ay sameeyeen dhinacyada ku lug leh qalalaasaha marka lagu daro DFKM. Weerarradan waxaa ka dhashay kumanyaal dhimasho iyo dhaawac ah, burbur guryo dad lahaayeen iyo barakac boqollaal kun oo dad ah oo ka qaxay

caasimadda. Weerarrada kala duwan oo aan kala sooc lahayn waxaa reebaya xeerka aadanaha ee caalamiga ah. Warbixinno ah weerar aan kala sooc lahayn oo la adeegsaday hub culus meelo aad loo deggen yahay ama ay dad rayad ah badanaaba yimaadaan sida suuqa Bakaaraha ee Muqdisho way kordheen ilaa iyo markii ay kooxaha hubaysan ay qaadeen weerarro ka dhan ah DFKM May 2009kii.(17). Waxaa la soo sheegay in dhamaan ciidamada DFKM, ciidanka AMISOM, iyo kooxaha hubaysan ee ka soo horjeeda DFKM adeegsadeen mortorrada bombada ah.

Hay'adda Amnesty International waxay kale oo ay la tahay in DFKM aysan lahayn awood ay ku joojiso kala wareegga hubka faraha badan iyo qalabka ciidamadeeda inay helaan kooxo hubaysan iyo suuqa hubka ee Somalia, sida uu hoosta ka xarriiqay guddiga Kormeerka ee QM Somalia u qaabilsan.(18). Sida ay qabto warbixintii Disembar 2008, "80% in ka badan hubka caalamku ku maalgeliyay dhismaha ciidamada ammaanka ee DFKM ee Somalia waxaa loo wareejiyay ujeeddoyin ka duwan sidii loogu talagalay." (19). Hubkaas la wareejiyay iyo qalabka ciidan waxaa diiwaan geliyay Guddiga Kormeerka, waxaana dhacday in ciidamo u kala baxsadaan dhinacyada kala duwan. Iibka hubka, dharka ciidanka iyo qalabka waxaa ka dambeeyay xubno ka tirsan ciidanka DFKM. Kooxaha mucaaradka ee hubaysan waxay qabsadeen hub iyo qalab; hubka kaalmada ah ee caalamku bixiyay oo loo wareejiyay si ka duwan sidii loogu talagalay ee ahayd inay adeegsadaan ciidanka ammaanka iyo booliska. Kaalmadaas waxaa loo wareejiyay ciidanka qalabka sida ee DFKM iyo kooxaha hubaysan, meesha booliska DFKM naf ahaantooda ay si weyn ugu qaybqaateen iska hor-imaadka hubaysan. Inkasta oo codsiga uu Maraykanku si gaar ah ugu diray QM in laga dhaafto xayiraadda kor ku qoran ay ka mid ahayd warar kooban oo uu u baahnaa guddiga cunaqabataynta oo ku saabsanayd si khaas ah dabeecadda hubka iyo meelaha uu soo maray(20) codsiga ka ma muuqanin warar ku filan oo ku saabsan tafaasiil farsamo, tirada iyo suuqgeynta hubka iyo rasaasta si uu ugu suurtageliyo goobjoogeyaal madaxbannaan si ay Kooxda Kormeerka ee Somalia ay u awooddo in ay la socoto lumista ama wareejinta in ka mid ahayd hubkaas inta uu socday ama ka dib. Dadaalka guddiga xayiraadda ee Somalia oo codsanayay wax kasta oo ahaa ku dhaqanka joojintaas si loo helo tafaasiil dheeraad ah oo la xiriirtay qalabka kaalmada oo loogu deeqayo DFKM waxay ahayd inuu socdo, adkeeyo oo habeeyo, waxayna ahayd inuu la dhaqan galo guddiga xayiraadda oo kormeereysay cunaqabatada hubka oo uu soo rogay Golaha Ammaanku.

Siyaabo kale oo hub loogu deeqay DFKM waaba yaraa la xisaabtankoodu. Hay'adda Amnesty International waxay ogaatay qorshe uu Maraykanku watay oo ahaa in DFKM ciidankeeda loogu deeqo tiro badan oo lacag caddaan ah si ay hub iyo saad uga soo gataan gudaha. May 14, 2009kii dowladda Maraykanku waxay codsatay in laga joojiyo xayiraadda si ay ugu deeqdo USD\$2milyan oo caddaan ah ciidamada ammaanka Qaranka si ay ugu soo gataan hub iyo rasaas iyo saad ay ka so gataan gudaha dalka, sidaas darteedna loo qaatay in qayb ahaan ay ka timaaddo suuqyada hubka. Hay'adda Amnesty International waxay fahamsan tahay in meesha lagu bixinayo lacagtaas ay kormeerto hay'ad caalami ah ee xisaabaadka oo ay hoostimaaddo qandaraas DFKM oo la saxiixay Luulyo 2009 si ay dusha uga eegto maalgelinta ay bixiyaan deeq bixiyayaasha caalamku oo loogu talagalay aadaminimada iyo kaalmada qaybta ammaanka.(21). Tafaasiisha farsamada dusha ka eegista si cad daboolka looga ma qaadin. Hase yeeshee, xataa haddii lacagtan aan laga wareejin ciddii heli lahayd iyo adeegsigeeda meeshii ay ku dhamaan lahayd, si kastaba ha ahaatee, maalgelinta ka soo gadashada ka-ganacsadayaasha hubka ee gudaha waxay kaalmaynaysaa in dhaqaalaha Muqdisho uu sare u kaco, suuqa hubka gudaha oo aan la kontaroolin: isla suuqa ah sida

warbixinadu sheegayaan il weyn ee hubka ee Al-Shabaab iyo kooxo hubaysan oo kale oo ka soo horjeeda DFKM, oo naf ahaantooda lagu eedeeyay in ay galeen dambiyo dagaal iyo ku-xadgudubyo xuquuqda oo kale oo halis ah. Suuqyadan oo dakhli la soo geliyo waxay sii shidaysaa ammaan la'aanta fog taas oo dadka rayadka ah ee Somalia ay ku hoos nool yihiin. In laga hubeeyo ciidanka ammaanka ee DFKM maalgelin gudaha ah ee hubka DFKM waxay kale oo ay wax aan suurta gal ahayn ka dhigaysaa in deeqbixiyeyaasha caalamku ay go'aan ka gaaraan haddii hubkan la astaameeyay lana diiwaangeliyay sida uu qabo habka dabagalka hubka caalamiga,(22), taas oo xagaldaacinaysa la xisaabtanka hubkaa, waxaana ku adkaanaysa DFKM ama deeqbixiyeyaasha inay u kuurgalaan u wareejinta kooxo kale oo hubaysan iyo in uu u gacan galo meelo sharci darro ah.

TABABARIDDA CIIDAMADA QALABKA SIDA IYO BOOLISKA

Bishii Abriil (Rajal Hore) 2009, waxaa Brussels ku kulmay deeqbixiyeyaal caalami ah; dowlado iyo hay'ado aan dowli ahayn ayaa ballanqaaday lacag ka badan \$213 milyan oo ah dhaqaale loogu talagalay AMISOM iyo qaybta hay'adaha ammaanka ee Soomaaliya (23). Dowlado iyo hay'ado aan dowli ahayn ayaa u ballanqaaday, qaar ay hadda bixinayaan, tabarro iyo qalab ciidamada qalabka sida iyo booliska ku sugan koonfurta iyo bartamaha Somalia, isla markaas u ballanqaaday qaybta hay'adaha ammaanka ee Somaliland iyo Puntland. Oktoobar (Soon Fur) 22, 2009, madaxa ciidamada qalabka sida ee DFKM waxaa laga soo xigtay inuu yiri in ka badan 3,000 oo ciidan oo militari iyo boolis isugu jira ayaa lagu tababarayaa Itoobiya, Kenya, Djibouti iyo Ugaandha.(24). Dhowr dal oo kale ayaa ku lug leh, ama ballanqaaday, tababar ciidamadan (eeg shaxda 1 iyo 2 ee lifaaqa dokumentigan oo bixinaya tafaasiil dheeraad ah ee la xiriirta kaalmada ammaanka ee DFKM).

Xoogaa dadaal ah ayaa la sameeyay in la isku dubbarido kaalmadan oo loo soo maray guddiga ammaanka ee isku dhafan(25), oo lagu sameeyay heshiiskii nabadda ee Djibouti. Hase yeeshee, in badan oo ah kaalmada caalamiga oo loogu talagalay tababaridda militariga iyo booliska ayaa waxaa ka maqan caddayn iyo inay raacsan yihiin heerka caalamiga: qaar dowladaha ka mid ah ayaa u sheegay guddiga xayiraadda ee QM in ay tababarayaan ciidanka DFKM kaliya markii tababarkii dhamaaday. Tababar ku deeqayaal ay ku jiraan Itoobiya(26) iyo Kenya ku ma aysan dhaqmin ka joojinta guddiga xayiraadda ee Somalia. Warbixinteedii ugu dambaysay Kooxda Kormeerka ee Somalia waxay muujisay welwel ah in manhajka tababarka ee Itoobiya oo lagu tababarayo ciidamada qalabka sida iyo booliska ee DFKM ee sannadkii 2008 inuusan jirin ama aan si fiican loo qeexin iyo taas oo ka muuqatay tixraac ka hortag kacdoon, xataa ciidanka booliska, taas oo ay ahayd inaysan ku lug yeelanin aragti ahaan howgal ciidan iyo ka hortag argagixiso. Tan isla markaas waxay ahayd markii ciidanka Itoobiya ay howlgalka ka wa deen gudaha Somalia, oo laguna eedeeyay inay galeen ku xadgudub halis ee la xiriira xuquuqda caalamiga iyo xeerka xuquuqda aadanaha, marka lagu daro weerarro aan isku dhigmin oo aan loo kala aabayeelin, toogasho sharciga ka baxsan, xabbis baahsan iyo jirdil.(27). Kenya waxaa ka soo baxay sheegasho Oktoobar 2009kii in qaxootiga Somalida ee ku sugan xeryaha Dhadhaab iyo Somalida reer Kenya in lagu soo jiitay tababar ciidan gudaha Kenya iyo in loo tababaro ciidanka DFKM si khiyaamo ah.(28) In tababar la siiyo dad ka yimid xeryaha qaxootiga waxay ku xadgudubaysaa mabaadiida ah in xeryaha qaxootiga noqdaan si gaar ah rayad oo leh dabeecad bani-aadannimo.

Deeqbixiyeyaasha dowladaha iyo ururro goboleedyada dhaqaale ugu deeqaya tababarradan iyo kaalmada waxqabadka, ama ayagu naf ahaantooda ku deeqaya kaalmadaas oo kale waa inay hubiyaan inay kaalmadaas si dhab ah ula jaanqaadayso xeerka caalamiga ee xuquuqda insaanka iyo qaanuunka aadananimada si ay u kabto heerar isku habaysan, waana inaysan noqon mid halis khatar ah u keeneysa kaalmaynaysana ku-xadgudubka xuquuqda insaanka. Arrintaas oo lagu guul darraysto waxay keeneysaa in la qaado mas'uuliyad caalami ahaan fal qaladdan ah (.29). Hay'adda Amnesty International waxay aaminsan tahay inay deeqbixiyeyaashu u gargaaraan DFKM si ay u hormariso qaab iyo fal gudaha ciidankeeda ammaanka si ay u hor-istaagto ku-xadgudubka xuquuqda aadanaha, iyo inay qaaddo

tallaabooyin waxku-ool ah, madaxbannaan oo ah dhexdhexaad, in la isla xisaabtamo iyo kormeer. Deeqbixiyeyaashu waa inay hubiyaan, tusaale ahaan, inaysan dhiirrigelinin, xataa haddii aysan ahayn wax loo kasay, adeegsi xoog oo ah mid aan loo kala aabayaelin ama xadgudub ah, ama in DFKM ciidankeeda lagu tababaro wax ka soo hor-jeeda xeerka caalamiga ah iyo heerarkiisa, sida muuqata inay ka dhacday Kenya dhowaan, iyo in aanan wax gargaar ah la siinin ciidamada qalabka sida oo adeegsanaya carruur loo isticmaalo ciidan ahaan. QM waxay ku warbixisay inay jireen carruur askar ahaan loo adeegsaday sidaasna ay sameeyeen maleeshiyaad gacansaar la leh DFKM 22008.(30) Nofembar 20, 2009, DFKM waxay ballanqaaday inay ku dhaqmayso Axdiga Xuquuqda Carruurta. Si kastaba ha ahaatee, ma jiraan wax farsamo waxku-ool ah oo la hayo si loo hubiyo inaysan ciidamo ku dagaallamaya magaca DFKM aynan u adeegsanin carruur askar ahaan.

Hay'adda Amnesty International waxa kale oo ay ka welwelsan tahay kuwa la tababaray iyo kuwa la carbiyay inaan loo haynin wax ku filan oo muujinaya in si wanaagsan xogtooda loo baaray si loo hor-is-taago inay ciidamada qalabka sida iyo booliska ee DFKM ku soo dhexdhuuntaan sharwadeyaal looga shaki qabo inay galeen xadgudubyo ka soo horjeeda xuquuqda aadanaha, waana in la helaa wax muujinaya awoodda ciidanka. Qaar ka mid ah dowladaha tababar ugu deeqay DFKM u ma muuqdaan inay raaceen wax halbeeg ah oo la xiriira ka qaybgalkooda (tababarka). Dowladaha Maraykanka, Fransiiska iyo barnaamijka horumarinta ee QM(UNDP)dhamaan waxay isku dubbarideen halbeeg ka-qaybgalka ee xubnaha DFKM ee tababarka ay ku deeqeen, laakiinse halbeegyadan sida badan si madaxbannaan loo ma qiri karo, si looga saaro meesha dembiileyaal galay ku xadgudub halis ah ee xuquuqda aadanaha. Inay awoodi waayaan dowladahaas iyo hay'adahaas ku deeqaya tababarka inay si madaxbannaan dabagal ugu sameeyaan saraakiisha booliska ee loo carbiyay barnaamijka tababarka, sababtuna ay tahay ammaan darro iyo inaysan howlwadeennada UNDP gaari karin bartamaha iyo koonfurta Somalia(31), waxay su'aal halis ah ka keenaysaa awoodda ah inay ka saaraan (ciidanka) xubno boolis ah oo looga shaki qabo inay geysteen xadgudubyo xuquuqda aadanaha oo ay ka mid yihiin ciidanka booliska ee ay DFKM dib u habaysay. Xulitaanka kuwa lagu tababarayo gudaha Somalia waxaa sameeya DFKM, ama madax boolis ah (32) ee DFKM marka uu jiro tababar boolis oo ay fidineyso QM.

Intaas waxaa sii dheer, Hay'adda Amnesty International waxay ka welwelsan tahay in qaar ka mid ah booliska somalida ee la tababarayo, kuwaas oo aragtia ahaan ay tahay inaysan ku lug yeelanin howlgal ciidan, in ay suurtagal tahay in looga jeedo in goobta loogu buuxiyo DFKM la dagaallankeeda kooxaha hubaysan ee ka soo horjeeda, meeshii laga diyaarin lahaa xirfadda, heerka iyo awoodda loo baahan yahay howlgallada hirgelinta sharciga. Baahida loo qabo howlwadeenno si wacan u tababaran oo hirgeliya sharciga iyo ciidanka military si ay u daafacaan dadka rayadka ah ee Somalia waa wax aan la dafiri Karin. Laakiinse ula jeeddada ay sheegtay bulshada caalamka oo ah in ay u tababarto 6,000 askari DFKM iyo 10,000 oo ah saraakiil boolis ilaa dhamaadka 2010(33), (oo 3dii biloodba la tababarayo 2,000 oo carbisan) waxay oggolaanaysaa oo kali ah waqti iyo imkaaniyaad yar si loo hubiyo in ixtiraamka iyo dhowrista xuquuqda aadanaha ay ka mid tahay dhabta ciidamada ammaanka ee Somalia.

Hay'adda Amnesty International waxay soo dhoweyneysaa barnaamijka horumarinta QM (UNDP)ee dhowaan lagu daray tiro ah qaab siyaasad tababarro oo looga jeedo in lagu daro heerarka xuquuqda aadanaha, iyo in la kala saaro heerarka ku dhaqanka siyaasadda iyo heerarka howlgallada ciidamada qalabka sida, marka lagu daro qaabka tababarka loo

samaynayo: hirgelinta ammaanka iyo adeegsiga xoogga; farsamo aan hubaysnayn/gacan furan, oo ah is difaac; in ciidanka wax lala qabto, ayada oo la sharxayo dowlada booliska ee difaaca dadka rayadka ah iyo kala duwanaanta dagaalka iyo dowlada u gargaarka dagaalka; iyo mabaadiida xuquuq u sinnaanta ragga iyo dumarka.(34). Si kastaba ha ahaatee, tababarka iyo gargaarka ciidanka ammaanka ee Somalia waa inaan loo sharxin oo kali ah inuu yahay waajib ciidanka ammaanka saran marka la eego insaanayadda iyo xeerka xuquuqda aadanaha iyo heerarka taas oo ay tahay in ciidanka ammaanku ay qadderiyaan iyo heerarka ugu fiican ee caalamiga ah ee hirgelinta ammaanka. Xuquuqul insaanka caalamiga ah iyo heerarka xuquuqda aadanaha waa in lagu daraa wadiiqada heerarka howlgallada iyo kitaab-yare(manual) oo ay adeegsadaan ciidamada ammaanku. Tababarka iyo gargaarku waa inay la socdaan waqti ku filan marka uu jiro carbis dhab ah oo ay ka wada qaybqaataan dhamaan ciidanka taas oo muujinaysa dhabta ah ee xaaladda sugitaanka ammaanka, ayada oo lagu tuuntuusanayo hirgelinta dhabta ah ee xuquuqda aadanaha caalamiga iyo xeerka xuquuqda insaanka iyo heerka ugu fiican ee dhabta ah.

Hay'adda Amnesty International waxa kale oo ay soo dhoweyneysaa dedaalka, ayada oo lagu jiro xaalad adag, inay unkaan xoogaa ah isla xisaabtan madaxbannaan iyo farsamada kormeerka qaybta ammaanka, marka lagu daro taageerada horumarinta guddiga la talinta ee booliska, oo ka kooban hoggaamiyayaasha bulshada kuwaas oo booqasho ku taga goobaha xabsiyada iyo saldhigyada booliska ee hoos yimaadda kontaroolka DFKM gudaha Muqdisho, booqashooyinkaas oo marar badan halis ku keeni kara ammaankooda. Si kastaba ha ahaatee, dedaalladan waxay ku eg yihiin saldhigyada booliska oo ay ciriiri ku hayso ammaan darro.

Sida laga soo xigtay saxaafadda iyo bulshada rayadka ah, DFKM waxay kale oo ay dhistay maxkamad ciidan bishii Oktoobar, 2009, in lagu maxkamadeeyo howlwadeennada ammaanka ee DFKM kuwa lagu soo eedeeyo dambiyada ka dhan ah dadka rayadka ah, sida dilka, xatooyo iyo in xoog wax lagu qaato. Tani waxay ishaaraysaa diyaarsanaan siyaasadeed in wax laga qabto cabashada muddada dheer jirtay ee ka timid dadka rayadka ah oo la xiriirta anshax xumo ciidamada DFKM. Si kastaba ha ahaatee, heerarka xuquuqda insaanku waxay u baahan yihiin in maxkamadda ciidanku ay ku ekaato dambiyada soocan ee ah dembi ciidan oo kali ah oo ay galeen howlwadeennada ciidanku(35), waxaana kale oo jiray inay sheegeen ururro xuquuqda insaanka ee madaxbannaan welwel qoto dheer oo la xiriira in maxkamadaynta howlwadeennada ciidan oo ay ku qaaddo maxkamad ciidan dembiyo caadi ah iyo ku xadgudub xuquuqda aadanaha inaysan marar badan dhexdhexaad noqonin, natiijadiina waxay noqotay in la sii daayo dambiile.

Ugu dambayntii, hay'adda Amnesty International waxay si qoto dheer uga welwelsan tahay in tababarrada militariga iyo booliska ee DFKM ay bixinayaan ciidamo ammaan ee ajnabi ah, sida ciidanka ammaanka ee Itoobiya, oo naf ahaantooda lagu eedeeyay ku xadgudub is dabajoog oo ka dhan ah xuquuqda caalamiga ee aadanaha iyo xeerka insaanayadda ee Somalia, oo ay ka mid yihiin toogasho sharciga ka baxsan, dil sharci darro ah, iyo weerarro aan loo kala aabayeelin oo aan isku dhigmin.(36). Marka lagu daro maqnaanta warar tafaasiil leh oo la xiriira dabeecadda iyo xaddiga iyo manhajka tababarka oo ay Itoobiya siinayso ciidanka ammaanka ee DFKM, Amnesty international waxay ka welwelsan tahay in tababarradaas aysan ku jirin wax ku filan oo damaanad qaadaya in la hubiyo qadderinta aadannimada caalamiga ah iyo xeerka xuquuqda insaanka iyo heerka dhabta ah ee ugu fiican.

Intaas waxaa sii dheer, Amnesty international waxay ku boorrinaysaa AMISOM, taas oo tababaraysaa 6,000 askari ee DFKM oo waliba siinaysa tababarro hubka fudud booliska la carbinayo, inaysan ku darin kooxdeeda wax tababaraysa wax howlwadeenno ah oo ka socda AMISOM oo looga shaki qabo inay galeen ama amreen ku xadgudubyo la sababayn karo ee insaaneyadda caalamiga ah ama xeerka xuquuqda aadanaha. Si tan loo sameeyo waa in la hirgeliyaa baaritaanno dhexdhexaad ah oo madaxbannaan oo la xiriira sheegashada ah in askarta AMISOM ay si aan kala sooc lahayn u duqeeyaan una bambeeyaan meelaha dadku deggen yahay ama dadka rayadka ah ay u tagaan si joogto ah.

TALOYIN

Iska hor-imaadka hubaysan ee Somalia iyo taag darrida hay'adaha DFKM waxay ku keenayaan taxaddi dhibaato leh bulshada caalamka. Amnesty International waxay aaminsantahay inaysan jirin wax soo fiicnaansho ah xaga xuquuqda aadanaha iyo xaaladda bani aadannimada haddii qaybaha isku haya qalalaasaha Somalia ay sii wadaan inay ku tacaddiyaan xuquuqda bani aadannimada ee caalamiga ah iyo xeerka insaaneyadda ayada oo aan waxba laga qabanin.

Amnesty International waxay u soo jeedinaysaa dhamaan dowladaha iyo ururrada aan dowliga ahayn oo ugu deeqaya ama ka fiirsanaya inay ugu deeqaan kaalmo ammaan DFKM:

- in la joojiyo dhamaan ku deeqidda hubka , ciidan iyo qalab ammaan iyo kaalmo dhaqaale oo la xiriirta hub loo soo gado DFKM ilaa inta laga helayo farsamo waxtar leh oo lagu joojinayo waxyaabaha kaalmada ah in loo isticmaalo in lagu galo tacaddi ka soo horjeeda insaaneyadda caalamiga iyo xeerka xuquuqda aadanaha;
- in la ixtiraamo xayiraadda hubka QM ee Somalia, marka lagu daro in marka hore laga codsado guddiga xayiraadda ee Somalia in ay dhaafaan waxyaalaha qaarkood , taas oo loola jeedo in loogu deeqo mid kasta oo la soo jeediyay oo la xiriira kaalmo la siinayo qaybta ammaanka ee DFKM; dhamaan dowladaha waa inay tixgeliyaan sharciga ama wax kale oo ah tallaabo sharci, haddii aysan taas horay u samaynin, ayaga oo ku biirinaya waajibkooda hoos imaanaya xayiraadda ay soo rogtay QM, kaas oo ka dhigaya ku-xadgudub eed dambiilenimo, si gooni ah sida uu codsaday Golaha Ammaanka ee QM.
- in guddiga xayiraadda la siiyo tafaasiil buuxda ee wax kasta oo ah qalab militari iyo ciidan ammaan ama tababar loogu deeqayo DFKM, haddii ayada oo lagu darayo noocyada farsamada khaaska ah ee qalabka lagu deeqayo, bixiyeyaasha , gaadiidkii lagu soo raray, waddadii iyo dekeddii ay soo mareen iyo meesha loola jeedo in la gaarsiiyo iyo ugu dambayn adeegsadhaha; haddii ay jiraan wax dhaafis ah ee la sameeyay ee bixinta qalabka ama tababar, ha lagu dadaalo in la helo tubtii iyo in si habaysan caddayn bixinta ka dib si loo hubiyo in aan qalabkaas meel kale loo wareejinin, iyo daba-gal iyo qiimeyn inta waxaasi socdeen ama tababarka ka dib si loo hubiyo in aan si xun loo adeegsanin, warbixin natijada caddaymahan in loo diro guddiga xayiraadda ee Somalia iyo kooxda kormeerka ee Somalia;
- in la hubiyo in kaydkeeda hubka, marka lagu daro hubka yaryar iyo ka fududba, ay si cad u calaamaysan yihiin ayada oo la raacayo agabka dabagalka caalamiga ah oo uu qaatay Golaha Guud ee QM 2005tii; in saxaradaha rasaasta iyo shixnadaha ay si gaar ah u calaamadaysan yihiin oo ay leeyihiin nambor iyo aqoonsi kale iyo in diiwaangelin la hayo calaamadaynaysa hubka iyo rasaasta labadaba;
- in ciidanka DFKM la siiyo tababar la xiriira isla-xisaabtan iyo maamulka hubka iyo in lagu ururiyo (hubka) meel ammaan ah, sida uu qabo heerka caalamiga ah iyo dariiqa ugu fiican ee ku-dhaqankeeda. Kuwan waa inay ka mid noqdaan:

- Ku-dhaqanka ugu habboon ee hubka kaydsan maamulkiisa iyo ammaan lagu soo saaray (OSCE) Kitaab-gacameedka ku-dhaqanka ugu fiican ee Hubka yaryar iyo kan fudud (2003dii), oo ay ka mid yihiin in si wacan loo diiwaangeliyo, in la hanti-dhowro diiwaangelintan, lagu kaydiyo meel ammaan ah iyo gaadiid ku filan iyo qorshe kayd oo ammaan ah ee hubka yaryar iyo kan fudud ee kaydka ah;
- in la helo tallaabooyin xagga maamulka, isla-xisaabtanka, kormeerka, kaydinta iyo ammaanka iyo kaydka rasaasta caadiga ah oo ay soo jeedisay Kooxda QM ee ku - xeeldheer dowladnimada oo la sameeyay ayada oo la raacayo Go'aankii Golaha Guud 61/72 si loo tixgeliyo tallaabooyin dheeraad ah si loo helo waxwada qabsi ayada oo la eegayo arrinta kaydka hubka caadiga ah ee dheeraadka ah (A/63/182).
- in la joojiyo hubka iyo qalabka la xiriira ee loo dirayo dowladaha iyo hay'adaha ajnabiga ah meeshaas oo ay ka jirto khatar halis ah, taas oo loo wareejin karo, toos ama dadab, hay'ado hubaysan, marka lagu daro DFKM ee Somalia, sidaas darteedna la sii adkeeyo waxtarnimada xayiraadda hubka ee QM ay ku soo rogtay Somalia;
- In si buuxda wax loola qabto Kooxda Kormeerka iyo guddiga xayiraadda ee QM, marka lagu daro in la siiyo wararka ay codsadaan iyo taageero siyaasadeed oo la siinayo Kooxda Kormeerka ee QM si loo hagaajiyo hirgelinta xayiraadda hubka ee ay QM ku soo rogtay Somalia, si loo soo afjaro hirarka hubka ah ee galaya Somalia iyo in la hor-istaago ku tacaddi dheeraad ah ee xuquuqda aadanaha. Si gaar ah, dowladaha deriska la ah Somalia iyo Eritrea waa inay la shaqeeyaan Kooxda Kormeerka ee QM iyo guddiga xayiraadda hubka, oo la hubiyo in xayiraadda hubka ee Somalia si buuxda loo fuliyay oo laga dhaqan geliyay gudaha dhulkooda.
- in la hubiyo in tababarka la siinayo ciidamada DFKM uu ixtiraamo xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah iyo xeerka insaaneyadda iyo in howlwadeennada tababarka la raadraaco si loo hubiyo inay iyagu naf ahaantoodu ka bedqabaan ku lug lahaanta ku-tacaddiga xuquuqda insaanka.
- in ciidamada qalabka sida ee DFKM la siiyo tababar dhab ah oo buuxa ayada oo la raacayo xuquuqda caalamiga ee aadanaha iyo mabaadiida xeerka xuquuqda insaanka, marka lagu daro waajibka ah in la kala saaro had iyo jeer waxa u dhexeeya bartilmaameed ciidan iyo dad rayad ah, iyo waajibka ah in la qaato dhamaan digtoonaanta loo baahan yahay si loo bedbaadiyo dadka rayadka ah iyo waxyaabaha rayadka ah;
- In lagu dadaalo, lana helo farsamo iyo kaalmo dhaqaale si loo sameeyo isla-xisaabtan waxgal ah, madaxbannaan, dhexdhexaad ah iyo in la kormeero habka dhamaan militariga, ciidamada ammarka iyo booliska ee DFKM ah iyo maleeshiyaadka la leh gacan-saar; habkaas waa inuu ka mid yahay kormeer diyaarsan, in la diiwaangeliyo iyo warbixin cad ee sheegashooyinka ah inay jiraan ku tacaddi xun ee xuquuqda caalamiga ee aadanaha iyo xeerka insaaneyadda oo ay ku xadgudbaan ciidamada ammarka ee DFKM iyo ama kuwa raacsan ciidamada DFKM iyo in kor loo soo qaado awoodda DFKM si loo helo baaritaanno madaxbannaan ee xadgudubyada;
- in loo hormariyo oo la helo farsamo iyo kaalmo dhaqaale ciidamada ammaanka ee

DFKM si loo sameeyo loona socodsiiyo baaritaan dhexdhexaad ah ama hab dabagal oo qayb ka ah dariiqadda carbinta, si loo hubiyo in kuwa looga shaki qabo xadgudub halis oo la sababayn karo ee xeerka aadananimada ama ku tacaddiga xuquuqda insaanka inaysan qayb ka noqonin ciidamada ammaanka ee cusub ee la carbinayo, taas oo ku xiran baaritaanno madaxbannaan oo dhexdhexaad ah;

- in si cad loo dhaleeceeyo dhamaan ku –tacaddiga xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah iyo xeerka insaaneyadda ee lagu galay gudaha Somalia, marka lagu daro kuwa ay galeen DFKM iyo in lagu dedaalo isla-xisaabtan tacaddiyadii horay loo galay;
- in lagu cadaadiyo DFKM inay si degdeg ah uga joojiso ciidamada howlwadeenno ay macquul tahay in looga shakiyo inay galeen ama amreen gelitaanka ku tacaddi halis ah ee ka dhan ah xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah iyo xeerka insaaneyadda, taas oo ku xiran baaritaanno wacan, iyo in caddaaladda la horkeeno qof kasta oo lagu helo inuu mas'uul ka yahay tacaddiyadaas, waliba maxkamadayn caddaalad ah ayada oo aan la adeegsanin ciqaabta dilka;
- in la taageero tallaabooyin leh aasaas adag si loo soo afjaro in aan dadka qaarkood dembi lagu qaadin gudaha Somalia, marka lagu daro samaynta Guddi baaritaan ee madaxbannaan , dhexdhexaadna ah, ama hab sidaas la mid ah, si loo baaro loona sawiro dembiyada hoos yimaada xeerka caalamiga, lana soo jeediyo tallaabooyin dheeraad ah oo la xiriira isla-xisaabtan.

Amnesty International waxay u soo jeedinaysaa Golaha Ammaanka ee QM iyo guddiga xayiraadda ee QM ee Somalia:

- In la hubiyo inaan wax dhaafis ah ee xayiraadda hubka ee Somalia la oggolaanin haddii codsiyada dhaafistu ay lug ku leeyihiin hub lagu deeqo , maalgelin ama tababarro fududayn kara ku- xadgudubyo halis ah ee xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah iyo xeerka insaaneyadda; in la diido in la oggolaado ku deeqid hub ama kaalmo kale haddii aan la helin warar ku filan si kooban heleyaasha kaalmadaas ammaanka iyo dhanka dabeecadda kaalmadaas, waddada la soo marsiiyay, iyo tafaasiil kooban iyo sumadayn hubka si loogu oggolaado Kooxda Kormeerka QM iyo dowladaha ku deeqaya inay raadiyaan wareejintooda is-dabajoogga ah ama haddii si xun loo adeegsaday;
- in si cad looga warbixiyo dabeecadda , tirada, meesha uu ka yimid iyo heleyaasha laga dhaafay xayiraadda hubka taas oo lagu soo ogeysiiyay, iyo haddii loo fasaxay , marka lagu daro warbixinta sannad walba la shaaciyo ee waxqabadyada;
- in la aqoonsado shakhsiyaadka ama hay'adaha looga shaki qabo ku xadgudubka xayiraadda hubka ee QM oo loo maro waddo cad, caddaaladna ah , ku salaysan heer cad iyo in si isku mid ah loogu dhaqmo heerarka caddaynta , ayada oo la eegayo xayiraadda la bartilmaameedsaday ee ku taalla dushooda.

Amnesty International waxay u soo jeedinaysaa Midowga Afrika, gaar ahaan Guddiga Ammaanka iyo Nabadda ee Midowga AFRIKA:

- in ay hubiyaan in xeerka howlgalka AMISOM uu si buuxda u la socdo xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah iyo xeerka insaaneyadda ee dhamaan howlgallada gudaha Somalia;
- in la sameeyo hab baaritaan si loo sameeyo dabagallo degdeg ah, madaxbannaan, dhexdhexaad ah oo ku saabsan sheegashooyinka xadgudubyada ee ka dhanka ah xuquuqda caalamiga ee aadanaha iyo xeerka insaaneyadda ee ay galaan howlwadeennada AMISOM, marka lagu daro sheegashooyin ah weerarro aan isku dhigmin oo aan loo kala aabayeelin, sida mortarro iyo duqayn loo geysto meelo aad loo deggen yahay; habkaas waa inuu hubiyaa sir ahaanta iyo ammaanka dacwoodeyaasha iyo marqaatiga ; waa inuu ka warbixiyaa waxa uu soo ogaaday si cad, waana inuu soo jeediyaa tallaabooyin asluubeed iyo ku-dedaal dacwo dembiilenimo ee ka dhan ah howlwadeen kasta oo lagu helo inuu mas'uul ka yahay tacaddiyo;
- in la hubiyo in dhamaan dowladaha xubnaha Midowga Afrika ay xushmeeyaan xayiraadda hubka ee QM, oo ay ka mid tahy waajibka ah in laga codsado guddiga xayiraadda ee QM ee Somalia dhaafitaan kasta oo ku saabsan kaalmada qaybta ammaanka ee DFKM, gaar ahaan dowladaha deriska la ah Somalia iyo Eritrea waa inay la shaqeeyaan Kooxda Kormeerka ee QM iyo guddiga xayiraadda.
- inay ballanqaadaan in wixii tababar ah iyo wax kale oo ah kaalmo ammaan oo ay dowladaha xubnaha ka ah Midowga Afrika ugu deeqayaan ciidamada ammaanka ee DFKM uu u baahan yahay carbin dhab ah ee adag iyo heerar howlgal oo loogu talagalay in la hubiyo in la xushmeeyo xuquuqda caalamiga ee aadanaha iyo xeerka insaaneyadda iyo in dhamaan howlwadeennada tababarka qaadanaa la raadraacay si loo hubiyo in aysan naf ahaantoodu lug ku lahayn tacaddiyo xuquuqda aadanaha.

Hay'adda Amnesty International waxay u soo jeedinaysaa Dowladda Federaal Ku-meel-gaarka ah ee Somalia:

- in ay si cad u ammarto ciidankeeda ammaanka iyo kooxaha gacan-saarka la leh inaysan qaadin weerarro lagu galayo wax sharci darro ah, marka lagu daro bartilmaameedsiga dadka rayadka ah, kuwa aan kala soocin bartilmaameedka ciidan iyo dadka rayadka ah ama meelaha rayadka ah, iyo kuwa , inkasta oo loo la jeedo meel ku habboon ee ah bartilmaameed ciidan, oo ay natiijad noqonayso wax aan isku dhigmin ee ku dhacaya dadka rayadka ah iyo meelaha rayadka ah; waana in la soo saaraa towjiih cad oo reebaya in dadka la iska xirto ayada oo aan waxba loo aabayeelin, iyo xarig degdeg ah, jirdil iyo dhaqan kale oo xun oo ay ka mid yihiin tacaddi galmo, dil ka baxsan sharciga, iyo in la dhaco hantida rayadka;
- in si degdeg ah howsha looga joojiyo xubnaha ciidanka ammaanka ee si la sababayn karo looga shakisan yahay inay galeen ku tacaddi xuquuqda caalamiga ee aadanaha iyo xeerka xuquuqda insaanka, taas oo ku xiran baaritaanno madaxbannaan oo waxgal ah;
- in la sameeyo wadiiqo dabagal ah oo waxku-ool, dhexdhexaadna ah si loo hubiyo in ciidamada qalabka sida iyo booliska aan lagu darin (loo qorin) qof ka da' yar 18 sano iyo in kuwa si la sababayn karo looga shakisan yahay tacaddi xuquuqda caalamiga ee aadanaha iyo

xeerka xuquuqda aadanaha laga joojiyo ama aan loo carbinin inay ka mid noqdaan ciidamada ammaanka ee cusub, arrintaas oo ku xiran baaritaanno madaxbannaan ee dhexdhexaad ah iyo inay raadsato kaalmo caalami ah oo leh heer wacan iyo ku dhaqanka ugu fiican marka la sameynayo wadiiqo raadraac ah ee ciidanka ammaanka;

- in ay raadsato kaalmo caalami ah si loo hubiyo in ciidanka ammaanka ee DFKM, haddii lagu daro taliyeyaasha askarta loo tababaro si wanaagsan oo ay ka mid tahay xeerka howlgallada si ay ugu fuliyaan howshooda si waafaqsan xuquuqda caalamiga ee aadanaha iyo mabaadiida xeerka insaaneyadda iyo heerka ku dhaqanka ugu fiican ee caalamiga;
- in la habeeyo kontaroolka kaydinta iyo soo saarista hubka iyo rasaasta oo la siinayo ciidanka ammaanka, sida uu qabo heerka caalamiga ah ee isla-xisaabtanka iyo maamulka hubka iyo in hubka lagu hayo meel ammaan ah;
- in si degdeg ah loo hubiyo baaritaanno madaxbannaan, waxku-ool ah oo dhexdhexaad ah marka la eego ku tacaddiga xuquuqda caalamiga ah ee aadanaha iyo xeerka xuquuqda insaaneyadda, oo ay ka mid yihiin dil sharci darro ah, jirdil iyo wixii kale oo dhaqan xumo ah iyo weerar sharci darro ah iyo in kuwa ka mas'uulka ah la hor keeno caddaalad sax ah ayada oo aan la dhaqangelineynin xukun toogasho;
- in la hubiyo dhibbanayaasha lagu xadgudbay xuquuqdooda aadanenimo ama xigtadooda ay xaq u leeyihiin inay helaan magdhow waxku-ool ah, oo ay ka mid yihiin in waxoodii loo soo celiyo, magdhow la siiyo, la baaniyo, la qanciyo iyo in loo ballanqaado in aysan taasi dib u dhacaynin.

LIFAAQ

SHAXDA 1: WAXA HADDA LOO BALLANQAADAY TABABARKA CIIDAMADA AMMAANKA EE HAY'ADAHA QAYBTA AMMAANKA EE SOMALIA

Bixiye	Qaate(Hele)	Meesha Tababarka	Tafaasiil	Xulista La tababarayaasha	Qalabka la siinaayo Ciidamada Amniga
USA	Ciidanka Ammaanka DFKM	Aad looma garanayo – waxaa ka mid ah Ugandha iyo Djibouti	Si buuxda looma yaqaanno kaalmada USA. Amnesty International waxay og tahay in qaar ka mid ah tababarrada ay soo mareen AMISOM, Ciidanka diffaaca ee gudaha (UPDF)Ugaandha, Iyo dowladda Djibouti, 750 la carbiye ee DFKM waxaa soo rartay USA ilaa Ugandha, oo ahaa tababar 9 bilood ah, (38)	Tafaasiil buuxda lama oga. Sid laga soo xigtay saraakiil USA ah 'Leahy Law' bixinteeda lagu dhaqmay, heer ah hal battaliyon, inkasta oo aan la ogeyn awoodda la carbiyeyasha haddii laga saaray(39)	Haa,(kor eeg).
<i>Faransiiska</i>	<i>Ciidanka Ammaanka Qaranka ee DFKM</i>	<i>Djibouti</i>	In ka badan lix 600(40) xubno ciidanka ammaanka dhamaystay tababar ay bixiyeen howlwadeenno Faransiis ah gudaha Djibouti,	La carbiyeyaal ay si toos ah u tababartay DFKM. 3 heer ee ay samaysay dowladda Faransiisku 1)La carbiyeyashu	

			<p>2009, qiimaha ay ku kaceen: Euros 1.5 million. Oktobar 9, 2009 dowladda Faransiiska waxay ku deeqday inay tababarto 3,000 kale oo askar ah.(41) Waxaa ka mid ah tababar ciidan ee aasaasi ah, wadahalallo la xiriiray dad rayad ah, wadahalallo la xiriiray waxa uu noqonayo dhambaalka nabad-ilaalinta iyo tababarro aasaasi ah ee xagga xuquuqda aadanaha</p>	<p>waa inay ka weynaadaan 18 sano;</p> <p>2)La carbiyeyaal lagu soo xulay 4.5 qaaciddada qabiilka ee Somalia waxay ka dhigan tahay inay masalayaan qabiillo kala duwan.</p> <p>3) La carbiyeyaashu waa inaysan lahayn waayo aragnimo dagaal oo hore, militari nimo ama maleeshiyaad, (ay qiimeeyeen tababareyaal ciidan iyo xirfadleyaal xagga hubka).</p> <p>Sida laga soo xigtay dowladda Faransiiska qaar la carbiyeyaasha ka mid ah waa laga saaray heerkan</p>	
Federalka Russia	Ciidanka ammaanka ee DFKM(42)	Qorshe lagu kaalmaynayay ama ka qaybgal tababar uu bixiyay Faransiisku gudaha Djibouti			

AMISOM/Ugandha	Ciidanka TFG, ciidanka booliska, Bartamaha /koonfurta Somalia	Uganda iyo Muqdishu, Somalia	6,000 askari in la toobabaridoono dhamaadka 2010. Maalgeliso Midowga Yurub (60 milyan Euros). AMISOM xataa waxay tababar u fidinaysaa boolis hub yaryar.(43) AMISOM xataa waxay tababar u fidisay boolis hub yaryar. 43		Haa, (eeg kor)
UNDP	Boolis, bartamaha /koonfurta Somalia, Booliska wax ilaaliya qaybta (SPU), Somaliland, booliska wax ilaaliya	UGANDA. Somalia (bixiyay tababareyaal boolis, Somalia, oo ayaga lagu tababaray Uganda). Akademiya Booliska , Muqdisho, oo hadda ka socoto dib u habayn	10,000 saraakiisha booliska ,DFKM in la tababaro ilaa dhamaadka 2010, sida laga helay shirkii Brussels, ee Kooxda Xiriirka Caalamiga ee Somalia. Tababarku wuxuu soconayaa 3 bilood markiiba ee qaybo 2000 la carbiyeyaal.	La tababareyaasha waxaa soo xushay madaxda booliska . Maxkamadaha, qaybta Djibouti la sheegay inay soo xulayaan la tababareyaal laga soo qaado ciidanka. Magacyada iyo tafaasiisha la siiyay UNDP ee murashaxiinta waa la baaray.	Baabuur(ka hor 2009)

Bixiye	Qaybta SPU),Puntland	Tababar Mustaqbalka	<p>Manjah la xiriira kala dambaynta, xoog la adeegsado iyo tbarar hub yaryar(mar dambe ay bixisay AMISOM) gacmo furan,(aan hubaysnayn) habka is-difaaca; aasaaska nolosha iyo barashada xirfadda; boolis adeegsada xoog ; taliye boolis, maamul iyo abaabul; ammaanka bulshada; Somalia iyo heerka sharciga caalamiga la xiriira ammaanka; xuquuqda dadka iyo sinaanta dadka;44.</p> <p>Qiyaasti 2,000 saraakiish shaqaynaysa iyo mushaaro la bixiyay(hadda la siiyo ashkhaas saraakiil ah oo loo soo mariyo xawaaladah, waa la hubiyay aqoonsiga qofka qaatay, la baaray sawirradooda, saxiix iyo warqado aqoonsi).</p> <p>Tababarka waxaa ka mid ah maamulka hubka iyo tababar ammaanka. Saldhig boolis oo loo hagaajiyay qaybta (SPU), Somaliland iyo Puntland(haddii lagu daro dhismaha hubka in si ammaan ah loo kaydiyo hubka).</p>		
--------	----------------------	---------------------	--	--	--

Kenya	Booliska DFKM, ciidanka DFKM	La qorsheeyay inuu ka dhaco Kenya	Oktobar 2008, wasaaradda arrimaha dibedda ee Kenya	Tafaasiil buuxda lama hayo, si kastaba ha ahaatee, hay'adda xuquuqda insaanka Human Rights Watch waxay diiwaangelis ay tababarro dhowaan ee Somali qaxooti ah iyo kuwo ah reer Kenya meelo u dhow xerada qaxootiga dadaab ee woqooyiga Kenya, waxaa ku lug lahaa carbiyeyaal ee dowladda Kenya. Kuwa la tababaray waxaa lagu qaaday baabuur waaweyn ee dowladda oo la geeyay xero tababar ciidan ku dhow Mombasa. Dowladda	

				Kenya way dafirtay inay lug ku leedahaycarb inta dadkaas ku sugan dalkeeda.47	
Midowga Yurub(EU)	Ciidanka ammaanka DFKM	La qorsheeyay inuu ka dhaco Uganda	Aad loo ma oga. Waxaa loola jeeday in la iskula dubbarido AMISOM guddiga Kormeerka, iyo qyb ka mid ah xuquuqda insaanka, la dabagalo, si macquul ah, qalabka iyo lacagta. Luulyo 2009 Midowga Yurub wuxuu sheegay inuu doonayo inuu diro koox qorshe dhanka Somalia tbaar la dagaallanka burcad badedka ee la barayo ciidanka ammaanka ee Somalia. La ma oga haddi tababarkan la sameeyay. Nofembar 17, 2009 guddiga Midowga Yurub wuxuu oggolaaday qorshe lagu kaalmaynayo tababarka ciidan amaanka DFKM.49	Tafaasiil buuxda la ma oga;	

ITOObIYA	Ciidanka ammarka, booliska, DFKM	Itoobiya	<p>Ciidanka xoogga ee DFKM, tababar 2007 ilaa 2008.(50)</p> <p>Intaas waxaa dheer tababar ilaa 1,000 la carbiyeyaal, booliska DFKM la rabay in la bilaabo Disembar, 2009, laba tababar oo soconayay 3 bilood markiiba, oo uu maalgelin lahaa Jarmalku. Talyaaniga oo sheegay inuu maalgelinayo tababar kale gudaha Itoobiya.</p>	La ma oga	<p>Sida laga soo xigtay guddiga kormaaraka ee QM saraakiil Boolis ah oo la tababaray ayaa waxaa la siiyey dhar ciidan iyo hub qof qof ah sannadkii 2007-2008 .51</p> <p>Guddiga kormeerka ee QM wuxuu kaloo sheegayaa iney socdaan deeq hub oo la siinayo DFKM iyo ciidanka Somalida iyo hubka suuqa ay geysteen Ciidanka Itoobiya 2008. 52</p>
Jarmalka iyo Talyaaniga	Ciidanka ammaanka DFKM	Itoobiya	<p>Taas oo looga jeeday in lagu maal geliyo tababarka ciidanka booliska ee DFMG gudaha Itoobiya oo logu talo galay inuu bilowdo Disembar 2009. Tababarka sida la sheegay dib ayaa loo dhigay. Talyaaniga wuxuu sheegay inuu tababar khaas ah siinayo ciidamada u tababaran sida booliska oo la mid ah Booliska</p>	Si buuxda looma oga. Waxay ahayd in DFKM ay soo xusho kuwii la tababari lahaa.	

			Talyaaniga.(carabinieri)		
Masar	Booliska iyo ciidamada amaanka ee DFMK	Masar	Tiro aan la aqoon oo Boliska Soomaaliyeed ah iyo ciidamada amaanka oo lagu tababari doono Akademiyada amaanka Mubaarak, iyo hay'adaha kale ee amaanka iyo ciidanka Masar	La ma oga	10,000 oo dharka Booliska ah
Boqortooyada Midowday	Ciidanka Ammaanka ee DFKM	La ma oga	Iney ku deeqaan la talin istratijiyadeed oo heer Wasaaradeed ah lana xiriirta dhanka ammaanka dawladda iyo talsika hubinta. Lama oga in kaalmadaasi la bixiyey. Barnaamij isku dubbaridan oo socda ee xagga waxbaridda iyo carbina aasaasiga ah ee ciidanka lugta ee DFKM iyadoo lala kaalmeysanayo AMISOM. Barnaamijkaan weli wuxuu sugayaa inay DFKM ahi oggolaato.	Waa mid aan ku lug lahayn tababar shakhsi ah. Sida laga soo xigtay dawladda Boqortooyada Midowday, kaalmadan qorsheysan waxay ka mid tahay mas'uuliyadda barnaamijka xuquuqda aadanaha ee UK iyo waajibkeeda laakiinse kama mid aha xuquuq khaas ah ee daryeelka aadanaha	

Sudan	Ciidanka amaanka ee DFKM	La ma oga	Tababarka 120 ciidanka khaaska ah ee difaaca 53	La ma oga	
-------	--------------------------	-----------	---	-----------	--

SHAXDA 2: DEEQ MAALGELINEED EE KALE OO LOO BALLAN QAADAY QAYBTA AMMAANKA EE SOMALIYA ABRIL 2009

Dal/Hay'ad	Tabaruc	Tafaasiil
Jaamacadda Carabta	18 milyan dollar	Oo si toos ah loo siinayo DFKM ciidankeeda ammaanka muddo 6 bilood ah
Biljijim	500,000 Euro	
Midowga Yurub	72 milyan Euro ee ciidanka amaanka Somaliya	60 milyan Euro oo loogu talo galay 6,000 ee askarta AMISOM.54 12 milyan Euro ee ciidanka Boliska sida ku xusan sharciga UNDP iyo barnaamijka amaanka gudaha Somaliya, marka lagu daro tababarka booliska iyo awood dhisidda Koonfurta & bartamaha Somaliya
Talyaaniga	4 milyan Euro	
Netherlands	1.5 Milyan dollar	Tababarka Amisom
Spain	6 milyan Euro	

TIXRAACYO

1 Hay'adda Amnesty International waxay soo xigatay si cad, warar la helayo oo laga helay ilo badan oo ah laba dhinac –iskaashi dhanka ciidanka ammaanka ee Somalia oo ay raadiyeen tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan iskaashi saraakiil dowladda iyo ururrada ka dhexeeya dowladaha. Amnesty International ma awoodin in ay tagto goobaha si ay u soo ogaato arrimaha xuquuqda aadanaha ee bartamaha iyo koonfurta Somalia, taasna waxaa keenay cabsi laga qabo in dhibaato ay soo gaarto ururk ay hay'addu la kulmi lahayd iyo shaqaala heedaba (hay'adda). Si kastaba ha ahaatee, Amnesty international waxay waraysi la yeelatay Somali badan oo qaxooti ah oo ka soo carartay, haddana ku sugan Kenya iyo Djibouti bishii Maarso 2009, waxayna si joogto ah ula xiriirtaa dhaqdhaqaaqaasha bulshaha rayadka ah ee gudaha Somalia.

2 Eeg go'aankii A/Res/64/48, Disembar 2, 2009, ee Golaha Guud ee QM, kaas oo ay taageereen 151 dowladaha xubnaha ka ah.

3 Eeg dokumentiga Amnesty International , Somalia : Suxufiyiin weerar lagu hayo (AFR 52/001/2008, Maarso 3, 2008); Somalia : Si joogto ah loo bartilmaameedsado : weerarro lagu hayo rayadka gudaha Somalia (AFR 52/006/2008, Juun 1, 2008); Ammaan darro xun : Weerarro lagu hayo shaqaalaha iyo difaacayaasha xuquuqda gudaha Somalia (AFR 52/016/2008, Nofembar 6, 2008);

4 Eeg QM, Warbixin khabiir madaxbannaan ee xaaladda xuquuqda aadanaha gudaha Somalia, Shamsul Bari (A/HRC/12/44, Sebtembar 17, 2009), iyo War saxaafadeed : Bulshada Caalamku waxay ka gaabisay barakaca Somalia, Wakiilka QM wuxuu leeyahy (Oktobar 12, 2009, laga helayo : <http://www.unhchr.ch/hurricane.nsf/view01/E16D50453D3903E3C1257656004/AEoED?opendocument>)

5 See Amnesty International war cad oo ay soo saartay, Somalia: waa in la soo afjaraa duqaynta gudaha Muqdisho (AFR 52005/2009, Juun 19, 2009);

6 Eeg Amnesty international War saxaafadeed, Somalia : Googoyin Naxdin leh, Juun 25, 2009; Amnesty International War cad, Somalia : Dilal sharci darro ah Jirdil muujinaya in AL-Shabaab ay ku jeesjeesayaan noloshu rayadka (AFR 52/2009/2009, Nofembar 24, 2009)

7 Midowga Yurub oo ku soo rogay xayiraad hub Somalia Disembar 2002, dib loo eegay Febraayo 2009 si loo joojiyo hubka deeqda ah, iyo qalabka la xiriira iyo kaalmada farsamada ee AMISOM; iyo hub la xiriira qalab iyo kaalmo farsamo oo kali loola jeedo in lagu kaalmeeyo horumarinta qaybta hay'adaha ammaanka ee Somalia sida laga soo xigtay tubta uu soo saaray Golaha Ammaanka ee QM. Eeg go'aanka midaysan ee Golaha Yurub 2009/138/CFSP ee Febraayo 16, 2009 oo ku saabsan tallaabooyin xaddidaya oo ka dhan ah Somalia iyo in la burriyo go'aanka midaysan 2009/960/CFSP

8 Eeg QM, Warbixinta Kooxda Kormeerka ku saabsan Somalia ayada oo la raacayo go'aankii Golaha Ammaanka 1811(2008), S/2008/769, Disembar 10, 2008,

9 Eeg QM, Warbixinta Kooxda Kormeerka ku saabsan Somalia ayada oo la raacayo go'aankii Golaha Ammaanka 1811(2008),S/2008/769, Disembar 10, 2008,

10 Eeg QM, warbixinta Xoghayaha Guud, ayada oo la raacayo Go'aankii Golaha Ammaanka 1846(2008), S/2009/590, Nofembar 13, 2009,

11 AMISOM waxay ka kooban tahay 5217 askar ka socota Uganda iyo Burundi.xilsaarnimadeeda ku xusanQM, go'aankii Golaha Ammaanka 1744(2007) waxaa ka mid ah in la qaado tallaabooyin loo baahan yahay: "(a) in la taageero wada-hadal iyo dib-u-heshiisiin ee Somalia ayada oo la taageerayo dhaqdhaqaaq xor ah iyo inay si nabad ah ku socdaan ,lana ilaaliyo dhamaan kuwa ku lug leh dedaalka ku xusan faqradaha 1,2, iyo 3;(b) in lagu deeqo , si habboon, ilaalinta hay'adaha Federalka ee ku-meel-gaarka ah si loogu kaalmeeyo inay fuliyaan howlaha dowladda iyo ammaanka kaabayaasha wax-ku-oolka ah;(c) in la gargaaro, inta ay la eg tahay awooddeeda, iyo in lala kaashado qaybo kale, fulinta Ammaanka Qaranka iyo qorshe deggenaana ah, gaar ahaan, in si wax-ku-ool ah dib loo habeeyo , lana tababaro dhamaan ciidanka ammaanka ee Somalia;(d) in loo gargaaro, sida la codsan karo iyo awoodda jirta, in la abuuro xaaladda loo baahan yahay ee ammaan si loo bixiyo kaalmo gargaar aadanenimo;(e) in la ilaaliyo shaqaalaheeda, imkaaniyaadkeeda, goobaheeda, qalabkeeda iyo dhambaalkeeda iyo in la hubiyo ammaanka iyo xornimada dhaqdhaqaaqa shaqaalaheeda.

Tan kale, AMISOM waxay ka mas'uul tahay sida xabbadjoojinta lagu heshiiyay gudaha Djibouti ee dhexmartay DFKM iyo Maxkamadaha, qaybta Djibouti, xagga ammaanka, ka dib marka ay askarta Itoobiya ka baxaan Somalia. Si isa soo taraysa ayaa waxaa AMISOM u bartilmaameedsaday kooxo hubaysan ee ka soo horjeeda DFKM sannadkii 2009, waxayna u eg tahya inay abuurantay qalalaase hubaysan ee gudaha ah. Waxaa jira sheegashooyin joogto ah oo ah in askarta AMISOM ay ku jawaabaan dab iyo duqayn markii lagu soo weeraro gudaha Muqdisho.

12 Dedaalkii Djibouti, heshiiskii ka soo baxay iyo xabbadjoojintii waxaa diiday kooxo hubaysan oo kale oo mucaarad ah, oo ay ka mid yihiin Al-Shabaab iyo Maxkamadaha , qaybta Asmara.

13 Warar dheeraad ah dartood, eeg tusaale ahaan Machadka Daraasaadka Ammaanka, Paula Cristina Roque, Dagaalka Muqdisho: muujinaya jilicsanaanta isku-daacadnimada iyo aqoonsiga, laga helayo:

http://www.issafrica.org/dynamic/administration/file_manager/file_links/18N03ROQUE.PDF?link_id=14&slink_id=8291&link_type=12&slin_type=13&tmpl_id=3

14 Go'aanka Golaha Ammaanka, QM 1872 (May 26, 2009)

15 Eeg Warbixinta Kooxda Kormeerka QM, Somalia S/2006/913; S2007/436; iyo S/2008/274

16 Taliska uu Maraykanku ku leeyahy Afrika, warsaxaafadeed, Agoosto 7, 2009(<http://www.africom.mil/getArticle.asp?art=3270&lan=>); Robert Wood(US wasaaradda Dibadda ku-xigaha afhayeenka), warbixin maalmeed, Agoosto 6, 2009(qoraal : <http://www.state.gov/r/pa/prs/dpb/2009/aug/126950.htm>)

17 Amnesty International, Somalia : Amnesty International waxay codsanaysaa isla-xisaabtan iyo ilaalin hubka lagu soo wareejinayo dowladda Federalka ku-meel-gaarka ee Somalia (AFR 522006/2009. Agoosto 11, 2009)

18 Warbixinta Kooxda kormeerka ee Somalia oo lagu soo saaray sida uu qabo go'aanka 1766(S/2008 /274, Abriil 24, 2008), Faqrada 178, 182

19 warbixinta Kooxda Kormeerka Somalia oo lagu soo saaray go'aanka 1811(S/2008/769, Disembar 10, 2008) faqrada 173.

20 Golaha Ammaanka ee QM wuxuu soo saaray isaga oo raacaya Go'aanka 744(1992), hordhaca guddiga ee dabeecadda shaqadeeda sida la adkeeyay, lagu noqday, oo uu qaatay guddigu May 11, 2009(<http://www.un.org/sc/committees/751/comguide.shtml>)

21 Eeg QM, warbixinta Xoghayaha Guud oo ka hadlaysa xaaladda gudaha Somalia(S/2009/373, July 20, 2009), Faqrad 19; 'Somalia waxay magacawday Hay'ad Xisaabeed,' wararka BBC. July 7, 2009

22 Heerarkaas waxaa lagu sheegay qalabka dabagalka caalamiga oo uu qaatay Golaha Guud ee QM, 2005.

23 Warmurtiyeedkii ugu dambeeyay ee shirka caalamiga ah ee lagu kaalmaynayay hay'adaha ammaanka ee Somalia iyo waajibka Midowga Afrika ee Somalia, Brussels, Abriil 23, 2009. Sida ay sheegtay warbixinta Xoghaya Guud ee QM ayada oo la raacayo go'aankii 1872(S/2009/503) Oktobar 2, 2009, " Sanduuqa kaalmada ee QM ee Hay'adaha Ammaanka ee Somalia wuxuu helay lacag ku dhow \$830,000 iyo sanduuqa Kaalmada ee AMISOM oo helay \$24.6 milyan. Ilaa \$1.5 milyan waxay deeqbixiyeyaashu toos u siiyeen DFKM, meesha Midowga Afrika uu helay wax ku dhow \$6.7 milyan."

24 Dowladda Soomalia waxay sheegtay in in ka badan 3,000 askar ah lagu tababarayo dalalka deriska ah, Puntlandpost, Oktobar, 2009

25 Guddiga Kormeerka ee wadajirka ah waxaa lagu soo saaray heshiiskii nabadda ee Djibouti waxaa guddoomiyay QM, wuxuuna ka kooban yahay wasiirro DFKM, Midowga Afrika, Midowga Yurub, Jaamicadda Carabta iyo goobjoogeyaal kale, wuxuuna u jeedaa in dusha laga eego lana isku dubbarido qaybta hay'adaha ammaanka ee DFKM. Guddigu wuxuu kulmay 3 jeer, 2009kii.

26 Warbixinta Guddiga Kormeerka ee Somalia oo la soo diray sida uu qabo go'aanka 1811 (S/2008/769, Disembar 10, 2008), faqrad. 168

27 eeg Amnesty International, si joogto ah loo bartilmaameedsado: weerarro lagu qaado dadka rayadka ah ee Somalia (AFR 52/2006/2008, Juun 1, 2008)

28 Hay'adda Xuquuqda Insaanka ee Human Rights Watch, Kenya : Jooji Carbinta Somalida ku jirta Xeryaha Qaxootiga, Oktobar 22, 2009

29 Mas'uuliyaddan waxay ku qoran tahay qodobka 16 ee matalaha Xeerka Caalamiga,

qoraallo ku saabsan mas'uuliyadda dowladaha ka saran falalka qaldan ee caalamiga ah , taas oo oranaysa: “ dowladdii kaalmaysa ama ku kaalmaysa dowlad kale in la galo fal caalami ahaan qaldan waxay caalami ahaan mas'uul uga tahay sidaas haddii : (a) haddii dowladdaas sidaas ay samayso ayada oo ogsoon xaaladaha falalka qaldan ; (b) iyo fal qaldan dan ee caalamiga ah, falkaasna caalami ahaan waa qalad haddii ay gasho dowladdaas.”

30 eeg Golaha Ammaanka QM, warbixinta Xoghayaha Guud ee ku saabsan carruurta iyo iska-hor-imaadyada hubaysan ee Somalia(S/2008/352), Juun, 2008; Golaha Ammaanka QM, koox ka shaqaynaysa carruurta iyo iska-hor-imaadka hubaysan, gebengabadii carruurta iyo iska-hor-imaadka hubaysan ee Somalia(S/AC.51/2008/14), Disembar 5, 2008

31 Warar dheeraad ah ku saabsan xadgudubyada ciidamada ammaanka ee DFKM, arag Amnesty International daabacaaddeeda: Somalia : Suxufiyiin Weerar lagu hayo)AFR 52/001/2008, Maarso 2008), si joogto ah loo bartilmaameedsado : Weerarro lagu qaado dadka Rayadka ee Somalia(AFR 52/2006/2008.Juun 1, 2008), Ammaan darro Xun: Weerarro lagu hayo shaqaalaha gargaarka iyo u doodeyaasha xuquuqda ee Somalia(AFR 52/016/2008, Nofembar 11, 2008)

32 Taliyihii booliska , Abdi Hassan Awale Qeybdiid, oo shaqaynayay ilaa 2007 waxaa beddelay Ali Mohamed Hassan Disembar 6, 2009.

33 sarkaalka siyaasadda ee QM u qaabilsan Somalia, shir caalami ahaa oo lagu taageerayay hay'adaha ammaanka ee Somalia iyo Howsha Midowga Afrika ee Somalia(AMISOM) Abriil 23, 2009, Brussels, Abriil 17, 2009, oo laga heli karo : <http://www.reliefweb.int/rwarchive/rwb.nsf/db900sid/EGUA-7R7KTB?>

34 Howsha Booliska Somalia, carbin aasaasi ah, manhaj 2009, taariikh Sebtembar 2009, laga helayo galka Amnesty International

35 Eeg mabaadiida iyo hordhaca ku saabsan xaqa maxkamadayn caddaalad ah iyo kaalmo xagga sharciga ee Afrika, oo uu qaatay guddiga Afrika ee aadanaha iyo dadka xaqooda: http://www.achpr.org/english/declarations/guidelines_Trial_en.html

36_Amnesty International ,Bartilmaameedsi joogto ah : weerarro lagu hayo rayadka Somalia(AFR 52/006/2006/2008, May 6, 2008)

37 Eeg Amnesty International, Somalia: Sheegasho in ciidanka Midowga Afrika hub ku furo dad rayad ah, baahi loo qabo baaritaan(war saxaafadeed, Febraayo 5, 2009); ka dibna waxaa jiray sheegashooyin dheeraad ah in AMISOM ay ku duqaysay kala sooc la'aan mortarro iyo madaafiic goobo ay dadku si joogto ah u yimaadaan, jawaab celin weerar kaga yimid kooxaha hubaysan. AMISOM way dafirtay taas.

38 Warbixin Xoghayaha Guud, QM, ku aaddan Somalia, asaga oo dabajooga Golaha Ammaanka 1872 (2009), S/2009/503

39 Deeqda Leahy waxaa ka mid ah go'aanka Maraykanka ee sannad laha ah ee la xiriira howlgallada ajnabiga ilaa 1997 oo ka mamnuucaya dowladda Maraykanka inay maalgeliso qayb kasta ee ciidamada ammaanka ee dal ajnabi ah haddii xoghayaha arrimaha dibedda uu

helo caddayn sheegaya in qolodaas ay gashay ku-xadgudub weyn ee xuquuqda aadanaha , haddii kale uu xoghayuhu go'aansado, warbixinna u diro guddiga wax ka qabashada in dowladda dalkaas ay qaadayso tallaabo wax-ku-ool ah oo ay sharciga hor keeneyso kuwii mas'uulka ka ahaa ee xubnaha ciidanka ammaanka. Xaaladaha kale, wasaaradda arrimaha dibedda waxay qiimeysay qayb ciidan ee ah qaybta ugu yare e howlgal samayn karta inay gashay dembi. Haddii kale, wasaaradda arrimaha dibedda ee Maraykanka waxay turjumi kartaa in qaybtan tahay batalyan(ama batalyano) : eeg Human rights Watch, "qaybta lixaad " : Militari – sida militari u tababaran Xiriir iyo siyaasadda Maraykanka ee Columbia(setembar 2001),fn.303. waxay u muuqataa in qayb militari oo yar la isticmaalay si saldhig looga dhigo ka saarista marka la eego kaalmada ay heleyso DFKM.

40 Warbixin Xoghayaha Guud ku saabsan Somalia, ayada oo la dabajoogo Go'aankii Golaha Ammaanka 1872 (2009),S/2009/503

41 War saxaafadeed Agence France, Faransiiska oo ugu deeqay tababar dheeraad ah ciidamada Somalida, Oktobar, 2009

42 Qoraal uu bixiyay wasiirka arrimaha dibedda ee Faransiiska , Bernard Kouchner, laga soo xigtay in "Russia ay kaalmaynaso haddii Faransiiku uu tababarayo askar Somali ah,' Agence France Press,Oktobar 7,2009

43 Howlgalka Booliska Somalia carbin aasaasi ah manhaj 2009, taariikh Sebtembar 2009

44 Howlgalka Booliska Somalia carbin aasaasi ah manhaj 2009, taariikh Sebtembar, 2009.

45 <http://allafrica.com/stories/200810100272.html>

46 Eeg, tusaale ahaan Daily Nation, Kenya oo qiratay in ay si qarsoodi ah ugu tababartay boolis Somalia, Oktobar 24, 2009

<http://www.nation.co.ke/news/-/1056/676620/-/5xeqd5/-/index.html>

47 Human rights Watch, Kenya: Jooji carbinta Somalida ku sugan xeryaha qaxootiga , Oktobar 22, 2009 (<http://www.hrw.org/en/news/2009/10/22/Kenya-stop-recruitment-somalis-refugee-camps>); Codka Maraykanka , Jeneral caddeeyay in Kenya ay tababarayso askar, Oktobar 23, 2009 (<http://www.reliefweb.int/rwarchive/rwb.nsfdb900sid/DKAN-7X4Q2L?>)

48 'Midowga Yurub oo tababaraya ciidanka Burcadda Somalida', wararka BBC, Luulyo 28, 2009 (<http://news.bbc.co.uk/2/hi/africa/8171922.stm>)

49 Golaha Midowga yurub, golaha oo gebengabeeyay ammaanka Yurub iyo siyaasadda Difaaca, 2974th xiriirka dibedda kulanka golaha, Brussels, Nofembar 17, 2009 (http://www.consilium.europa.eu/uedocs/cms_data/docs/pressdata/en/gena/111291.pdf)

50 Warbixin Kooxda Kormeerka ee Somalia, la soo saaray sida uu qabo go'aanka 1766 (S/2008/274, Abriil 24, 2008)

51 Warbixin Kooxda Kormeerka ee Somalia la soo saaray sida uu qabo go'aanka 1811 (S/2008/769, Disembar 10, 2008), Faqrad. 171

52 Warbixin Kooxda kormeerka ee Somalia, la soo saaray sida uu qabo go'aanka 1766 (S/2008/274. Abriil 24, 2008)

53 Sida laga soo xigtay warbixinta Xoghayaha Guud ku saabsan xaaladda Somalia(S/2009/684, Disembar 31, 2009)

54 Oktobar (Soonfur) 2, 2009, wararka Uganda waxay qoreen qoraal uu bixiyay wasiirka difaaca oo uu sheegayay EC ay joojisay maalgelinta askarta AMISOM gudaha Somalia, taas oo la xiriirta inay welwel ka qabaan xisaabihii hore sida ay wax u baxeen. Sarkaal ka socday xoghaynta Golaha Yurub ayaa u beeniyay Amnesty International in la joojiyay maalgelinta, inkasta oo uu sheegay in Golaha Yurub ay qabaan welwelkaas.

Amnesty International
International Secretariat
Peter Benenson House
1 Easton Street
London WC1X 0DW

www.amnesty.org

**AMNESTY
INTERNATIONAL**

